HERITAGE INSTITUTE

# Miraha Isbiimaynta Siyaasadeed: Baahida Soomaaliya u qabto wadaxaajood, Isla Xisaabtan iyo Xasillooni Siyaasadeed

02 | Faallo

Juun 2026

**Xuquuqda daabacaaddan © 2026 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute 2026.**

Muddo ka badan sannad iyo badh, Machadka Heritage ee Deraasaadka Siyaasadda (HIPS) waxa uu ka digayay, jihada ay siyaasadda Soomaaliya u socoto oo uu kusii siqaysa nuglaan, qabsanaan, iyo fashil. Qoraalo is daba joog ah oo uu Machadku muddadaas daabacay, kuwaas oo ay ka mid yihiin, 18 Bilood Waa Lagu Toosinkaraa Tubta Siyaasadda Soomaaliya; Gorfeynta Go'aanka Golaha Wadatashiga Qaranka; Guricas ilaa Guryasamo Dawladeed; Ka Hortagga Qalalaasaha Muqdisho: Ismuquuninta waa in Wadahal lagu Beddelo; iyo Waqtiga Oo Xaddidan Awgiis, Is-Afgarad Doorasho oo Dowlada & Mucaaradku Waa U Lama Huraan Xasilloonida Dalka, ayaa dhammaantood ku soo ururayay hal arrin. Taasi oo ah in khilaafaadka dastuuriga ah ee aan weli xalka loo helin, go'aannada siyaasadeed ee aan loo dhameyn ee badi halka dhinac ah, kalsooni darrada sii kordhaysa ee u dhexeysa daneeyayaasha siyaasadda, iyo maqnaanshaha wada-tashi dhab ahi ay dalka ku riixayaan qalalaase dhismaha dowladnnimada ku yimaadda. Intaas oo dhan, Machadku waxa uu si joogto ah carrabka ugu adkaynayay fartana ugu fiiqayey khataraha ka dhalan kara haddii aan arrimahaas wax laga qaban.

Maanta, wax badan oo ka mid ah arrimihii hore looga digay ayaa dhacay oo dhab noqday. Saddexdii Juun, iska hor imaadyo hubeysan ayaa ka dhacay Muqdisho kuwaas oo u dhexeeyay xoogagga mucaaradka iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxaana ku naf waayay dhallinyaro Soomaaliyeed. Rabshadahani waxay calaamad u noqdeen marxalad cusub oo khatar badan, xilli ay Soomaaliya isku biirsadeen arrimo ay ka mid yihiin hubanti la'aan siyaasadeed, amni darro, hay'ado nugul, cadaadis dhaqaale, iyo saameyno dibadeed oo isa soo taraya.

Saaxiibada caalamiga ah ee Soomaaliya, oo ay ku jiraan Mareykanka iyo Boqortooyada Ingiriiska iyaga oo ka duulaya khataraha sii kordhaya, waxay si cad ugu baaqeen hoggaanka dalka inay dib ugu soo laabtaan wadahadal, isla markaana si degdeg ah ugu heshiiyaan hannaan doorasho oo ku dhisan is-afgarad. Waxay ku tilmaameen xaaladda Soomaaliya inay marayso "waqti xasaasi ah".

Xiisadaha siyaasadeed ee hadda jira waxay ku soo beegmeen xilli dalka uu wajahayo duruufo aad u adag oo sida oodo dhacmeed u kala sarreeya, ha ugu horeyso Al-Shabaab oo weli khatar weyn ku ah amniga qaranka. Dhibaatooyin dhaqaale, xaalado bini'aadantinnimo iyo masiibooyinka cimilada ee soo noqnoqda ayaa culays weyn saaraya bulshada. Geesta kale, tartanka juqraafi-siyaasadeed ee Geeska Afrika, loollanka ka taagan badda, iyo khilaafaadka siyaasadeed ee la xiriira Somaliland iyo Soomaaliya inteeda kale ayaa sii kordhiyay walaacyada la xiriira madaxbannaanida iyo wadajirka dhuleed ee dalka.

Dhanka kale, xiriirka Dowladda Federaalka iyo qaar kamid ah Dowlad-goboleedyada Federaalka ayaa aad u xumaaday, halka hay'ado muhiim ah oo qaran ay wajahayaan muran la xiriira sharciyaddooda iyo muddada xileedkooda. Murannada dastuuriga ah iyaga weli xal looma helin, kalsoonidii u dhexeysay daneeyayaasha siyaasadduna way sii yaraanaysaa. Sidoo kale, arrimo ay ka mid yihiin, khilaafaadka ku saabsan doorashooyinka, matalaadda siyaasadeed iyo qaybsiga awoodaha federaalka ayaa sii xoojiyay kala qaybsanaanta siyaasadeed ee dalka.

Dastuurkii Ku-meel-gaarka ahaa waxaa markii hore loogu talagalay inuu noqdo hannaan ay daneeyayaasha Soomaaliyeed ku dhammaystiraan nidaamka federaalka, ku xalliyaan arrimaha dastuuriga ah ee weli taagan, isla markaana ku gaaraan nidaam dowladeed oo dimuqraadi ah. Haseyeeshee, qalalaaseyaasha doorashooyinka ee marwalba soo noqnoqda, madmadowga ku jira dastuurka, kala qaybsanaanta siyaasiyiinta, iyo siyaasadda ku dhisan dano gaar ah ayaa wiiqay saldhiggii nidaamkii siyasadeed wixii ka danbeeyay xilligii kala-guurka.

Dhaqankii is-afgaradka iyo wada-tashiga ayaa si tartiib tartiib ah meesha uga sii baxaya, waxaana taas beddelay go'aanno hal dhinac ah, loollan siyaasadeed oo dhinac walba guul gaar ah ku doonayo, iyo siyaasad ku dhisan is-maandhaaf joogto ah. Natiijadu waxay noqotay hay'ado sii daciifaya iyo kalsoonidii bulshada oo sii dhaawacmaysa.

Khilaafaadka siyaasadeed kuma cusba Soomaaliya xilligii dib-u-dhiska dowladnimada. Hase yeeshee, xaaladda maanta taagan waxay ka duwan tahay khilaafaadyadii hore, maadaama ay si isa soo taraysa uga tarjumayso daciifidda heshiiskii siyaasadeed ee saldhigga u ahaa nidaamka federaalka tan iyo sannadkii 2012. Taasina waxay dhalisay muran sii xoogaysanaya oo ku saabsan sharciyadda hay'adaha, cidda leh awoodda go'aan qaadashada, lahaanshaha dastuurka, iyo jihada mustaqbalka ee dowladnimada Soomaaliya.

Jihadan siyaasadeed ee Soomaliya u jiheysatay ma aha mid sii jiri karta, mana ahan cawaaaqib la'aan. Soomaaliyana ma sii qaadi karto culaysyada is biirsaday ee ka dhashay curyaannimada hay'adaha dowladda, murannada sharciyadeed, kacdoonnada hubeysan, dhibaatooyinka dhaqaale, xaaladaha bani'aadantinnimo, iyo tartanka juqraafi-siyaasadeed ee sii xoogaysanaya, iyada oo aan khatar loo gelin xasilloonida dalka.

Sidoo kale, lama filan karo in taageerada caalamku ay sii ahaato mid aan is beddelin iyadoo aan loo eegin hab-dhaqanka madaxda siyaasadda. Xilli dunidu sii gelayso marxalad qalafsan oo ay dowladaha waaweyni si ka fiirsi leh u kala dooranayaan halka ay xoogga saarayaan oo taageeradooda ku bixinayaan, is-maandhaafka siyaasadeed ee daba dheeraadana  wuxuu halis gelin karaa danaynta iyo dulqaadka ay beesha caalamku u hayso Soomaaliya.

Khatarahani ma aha kuwo mala-awaal ah, waxa la xusi karaa dhacdooyin qoyan oo la xiriira dhacdadan. Tusaale ahaan, iska hor imaadkii Muqdisho ka dhacay 3-dii Juun in uu khatar geliyay nolosha qaar kamid ah isimada dhaqanka iyo hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ee dalka, oo uu kamid yahay Ugaas Cabdirisaaq Ugaas Cabdullaahi Faracadde. Sidoo kale, 5-tii Juun waxaa la hor istaagay dhaqdhaqaaqii Madaxweynihii hore ee Soomaaliya, ahna hoggaamiye mucaarad, Shiikh Shariif Shiikh Axmed oo kusii jeeda guriga, kana guurey xarun uu saldhig ka dhigtay, isaga oo tixgelinaya is-afgaradyo lagu gaaray wada-xaajood dheer kadib. Labadan dhacdo waxay muujinayaan sida degdegga ah ee khilaafaadka siyaasadeed uga gudbi karaan muran siyaasadeed una noqon karaan khatar ku wajahan amniga bulshada, dhex-dhexaadinta iyo dib-u-heshiisiinta.

Arrinta walaaca sii kordhinaysa ayaa ah in hoggaamiyeyaashani ay ka soo jeedaan bulshooyin leh xiriir dhow oo bulsho iyo mid qabiilba. Sida la ogyahay, tabashooyinka ka dhasha dhacdooyinka noocan ahi kuma ekaadaan heerka siyaasadda, balse waxay si qotodheer ugu gudbi karaan bulshada dhexdeeda, iyaga oo sii xoojinaya kalsooni-darrada, adkaynayana mowqifyada siyaasadeed, isla markaana dhaawacaya rumaysnaanta lagu qabo wadahadalka iyo xalalka lagu gaaro is-afgaradka.

Isku-dhacyadii iyo rabshadii dhacay waxay meesha ka saareen fikirkii ahaa in qalalaasahani ku koobnaa muran u dhexeeya madaxda siyaasadda. Sababtoo ah marka khilaafaadka siyaasadeed ay gaaraan jidadka, dhiigna ku daato, waxay isu beddelaan masiibo qaran oo saameyn ku leh amniga bulshada, wadajirka bulshada iyo xasilloonida dowladnimada.

Waxa kale oo ay ina xasuusinayaan xaqiiqo muhiim ah: marka madaxda siyaasadda aan lagula xisaabtamin falalka masuuliyad darrada ah ee ay sameynayaan sida ku xadgudubka dastuurka, iyo hurinta khilaafaadka, cawaaqibka ugu weyn waxaa qaada shacabka Soomaaliyeed. Sidaas darteed, isla xisaabtan la'aanta siyaasadeed ma aha oo keliya dhibaato maamul, balse waa khatar toos ah oo ku wajahan nabadda, badqabka bulshada, iyo mashruuca dib-u-dhiska dowladnimada Soomaaliya.

Su'aasha maanta Soomaaliya hortaalla waxay tahay sidee looga hortagi karaa daciififidda iyo dhiigbaxa ku socda heshiiskii siyaasadeed ee saldhigga u ahaa xasilloonida dalka. Taas oo keliya looga jawaabi karo in la helo masuuliyad dheeraad ah, hoggaan geesinimo leh, iyo u diyaar ahaanshaha in danta qaranka laga hormariyo danaha kooxaha siyaasadeed. Masuuliyaddaasi kuma koobna madaxda siyaasadda oo keliya, balse waxay sidoo kale saaran tahay qaybaha kale ee bulshada ee saamaynta leh iyo saaxiibbada caalamiga ah ee danaynaya xasilloonida Soomaaliya.

Waxa kale oo loo baahanyahay hannaan wadahadal oo loo dhan yahay, kana baxsan kooxaha siyaasadeed ee iska soo horjeeda. Waxaa lama huraan ah in laga faa'iidaysto sumcadda, khibradda iyo saameynta hoggaanka bulshada Soomaaliyeed. Qaabkani waa kan keliya ee dib u soo celin kara kalsoonida, dhiirrigelin kara tanaasulka siyaasadeed, isla markaana xoojin kara geeddi-socodka dhismaha dowladnimada. Tallaabooyinkan waa in la qaadaa ka hor inta aan kharashka wax-qabad la'aantu ka badnaan qiimaha tanaasulka loo baahan yahay si heshiis loo gaaro.

Taariikhdu ma xusuusan doonto cidda ku guulaysatay khilaafaadka siyaasadeed iyo murannadda maanta taagan, balse waxa ay xusuusan doontaa in hoggaamiyeyaasha siyaasadeed iyo kuwa bulsheed ee Soomaaliya ay doonistooda gaarka ah ka horumariyeen ilaalinta dowladnimada, xilli kamid ah waqtiyadii ugu xasaasisanaa ee dalka soo maray tan iyo dhammaadkii xilligii kala-guurka.

## Siyaasadda Guulaystuhu Wax Walba Qaato iyo Cidhib danbeedkeeda

Dalalka kasoo kabanaya dagaallada sokeeye, gaar ahaan kuwa aan dhinacna si cad ugu guulaysan colaaddii dhex martay, badanaa laguma xasiliyo hannaan siyaasadeed oo ku dhisan in hal dhinac wax walba qaato. Nabadda waarta iyo dowladnimo shaqaynaysaa inta badan waxay ka dhalataa tanaasul, awood-qaybsi, hay'ado loo dhan yahay iyo is-afgarad siyaasadeed oo ballaadhan. Soomaaliyana kama duwana sidan.

Taariikhda siyaasadeed ee casriga ah ee Soomaaliya waxay marar badan muujisay cidhib-danbeedka iyo fashilka ka dhasha go'aannada aan la wada shuureyn. Isku dayo ay sameeyeen hoggaamiyeyaal ama isbahaysiyo siyaasadeed oo doonayay inay gacanta ku dhigaan fagaaraha siyaasadda ayaa ahaa dhif iyo naadir inay horseedaan xasillooni waarta. Midh midhka horumarka ka gaarayna waa mid inta badan ku timid markii dhinacyada iska soo horjeeda ay garwaaqsadeen nuglaantooda wadajirka ah, isla markaana ay doorteen wadahadal halkii ay ka dooran lahaayeen iska hor imaad; ayna tanaasuleen halkii ay ka dooran lahaayeen ka mindi mindi ku taag, ayna is afgarad ka doorbideen sidaad iigu listaan kuugu lisayaa.

Casharkani maanta wuxuu leeyahay muhiimad gaar ah. Taariikhda Soomaaliya waxa ay sidoo kale ina tusaysaa xaqiiqo kale oo murugo leh: khilaafaadka siyaasadeed way fududahay in la bilaabo, balse aad bay uga adag tahay in la xakameeyo ama la soo afjaro. Marka muran siyaasadeed isu beddelo rabshad, jihada uu qaadayo iyo halka uu ku dambaynayo inta badan lama saadaalin karo, cawaaqibkiisuna wuxuu ka gudbaa xisaabihii iyo qorsheyaashii dadkii bilaabay iyo ujeedooyinkii laga lahaaba.

Dhacdadii 1991-dii ayaa tusaale cad u ah arrintan. Burburkii dowladdii milateriga ahayd waxaa dad badani u arkayeen bilowga marxalad siyaasadeed oo cusub. Haseyeeshee, khilaafkii soo kala dhex galay dhinacyadii markii hore iskaashanayay ayaa si degdeg ah isugu beddelay iska hor imaad hubeysan. Kacdoon ku bilowday halgan looga soo horjeeday nidaam kali-talis ah ayaa isku rogay colaad ba'an oo u dhexeysa kooxo iyo jabhado iska soo horjeeda. Muran siyaasadeed ayaa isu beddelay masiibo qaran oo raadkeedu weli muuqdo soddomeeyo sanno kadib. Casharka ugu weyn ee laga bartayna waa in khilaafaadka siyaasadeed ee aan lagu xallin hannaan loo dhan yahay aysan ku ekaan dhibaatadii ay markii hore abuureen, balse ay inta badan saldhig u noqdaan khilaafaad kale oo hor leh.

Digniintani waxay si gaar ah ugu habboon tahay xaaladda maanta taagan. Xiisadaha u dhexeeya Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud iyo Madaxweynihii hore Shiikh Shariif Shiikh Axmed ma aha kuwo walaac leh oo keliya marka dhanka miisaanka siyaasadeed ee heer qaran loo eegayo, balse waa xiisad u dhexaysa hoggaamiyeyaal ka soo jeeda bulshooyin xiriir qabiil leh, aadna iskugu dhow siyaasad ahaan iyo taariikh ahaanba. Sidaas darteed, khilaafkoodu haddii aan la dabo qaban ma sii ahaanayo muran ku kooban siyaasiyiinta oo keliya, balse wuxuu halis ugu jiraa inuu saameyn ku yeesho bulshada ay matalaan isla markaana abuuro kala fogaansho dhex mara bulsho aad iskugu dhow.

Badanaa way adagtahay in la maareeyo khilaafaadka noocan ah haddii qaybsanaanta siyaasadeed ay gaadho bulshooyin sidaas isugu dhow, waxayna adkaysaa dedaallada dhexdhexaadinta iyo dib-u-heshiisiinta, oo waxay reebi kartaa tabashooyin iyo dhaawacyo bulsho oo muddo dheer sii jira. Sidaa darteed, waxay noqonaysaa khalad weyn in loo maleeyo in iska hor imaad kasta uu ahaan doono mid kooban, la xakamayn karo ama iska soo idlaan doona. Waayo-aragnimada Soomaaliya waxay marar badan muujisay in marka muran siyaasadeed yeesho saameyn amni, dhacdooyinku inta badan waxay qaadaam jihooyin ka baxsan gacanta dadkii markii hore huriyay ama doonayay inay ka faa'iidaystaan, xawaare ka duwan kii ay ku bilaabmeenna way yeeshan. Ugu dambayntiina, qiimaha ugu weyn waxaa bixiya shacabka caadiga ah iyo hay'adaha dowladeed ee xasilloonida dalku ku tiirsantahay.

## Natiijada Siyaasadda Isbiimeynta

Mid ka mid ah caqabadaha muddada dheer hadheeyay geeddi-socodka dib-u-dhiska dowladnimada Soomaaliya ayaa ah isla-xisaabtan la'aanta ka jirta hoggaanka siyaasadda. Marar badan falal dhaawacaya nidaamka dastuuriga ah, wiiqaya hay'adaha dowladda ama khatar gelinaya badqabka shacabka ayaa dhaca iyada oo aan cidina si dhab ah ugala xisaabtamin. Taasina waxay abuurtay dhaqan siyaasadeed oo caadiyeeyay masuuliyad-darrada, ku tumashada habraacyada dowladeed, iyo is-maandhaaf siyaasadeed. Dhammaan arrimahaasna badanaa hoggaamiyeyaashu kalama kulmaan wax cidhib-danbeed ah.

Soomaaliya ma dhisi karto dowlad waarta haddii siyaasiyiinta iyo daneeyayaasha awoodda leh loo oggolaado inay mar kasta abuuraan qalalaase siyaasadeed iyaga oo aan wax masuuliyad ah qaadin. Sidaa darteed, hoggaanka bulshada, aqoonyahannada, ururrada bulshada rayidka ah iyo saaxiibbada caalamiga ah ee daneeya xasilloonida Soomaaliya waa inay ka shaqeeyaan hirgelinta hannaano lagu xaqiijinayo isla-xisaabtan dhab ah. Hannaanadaasi waa inay awood u yeeshaan inay iftiimiyaan cid kasta oo ku lug leh hurinta xiisadaha siyaasadeed, carqaladaynta wada-hadallada, ku xadgudubka dastuurka, ama falal dhaawacaya geeddi-socodka dhismaha dowladnimada.

Ujeeddada isla-xisaabtanka noocan ahi ma aha aargoosi ama bartilmaameedsi siyaasadeed. Balse waa in la kordhiyo qiimaha siyaasadeed ee ka dhasha masuuliyad-darrada, lana xoojiyo ixtiraamka nidaamka dastuuriga ah iyo dowladnimada ku dhisan sharciyadda.

Waxa hubanti ah in nidaam dimuqraadi ahi aanuu ku sii jiri karin wanaagga ama isu-tanaasulka shaqsiyaad gaar ahi sameynayaan; oo uu u baahan yahay hay'ado adag, sharciyo ilaaliya nidaamka dowladeed, iyo hannaano isla-xisaabtan oo awood u leh inay ilaaliyaan dastuurka iyo kala dambaynta dowladeed xitaa cidda talada haysa ha noqotee. Sidaas darteed, xoojinta arrimahan oo ay ka mid yihiin dhowrista jadwallada dastuuriga ah, ixtiraamka heshiisyada lagu gaaro wada-hadallada iyo isla-xisaabtanka ku saabsan falalka khatarta gelinaya xasilloonida bulshada;muhiim u ma aha keliya dimuqraadiyadda, balse waxaa kale oo ay udub-dhexaad u yihiin jiritaanka iyo sharciyadda dowladnimada Soomaaliya mustaqbalka fog.

Dhimashada muwaadiniintii Soomaaliyeed ee ka dhalatay isku-dhacyadii dhowaan dhacay waa xusuus murugo leh oo muujinaysa in khilaafaadka siyaasadeed aysan ahayn muranno ku kooban siyaasiyiinta oo keliya, balse ay leeyihiin cawaaqib bini'aadantinnimo oo dhab ah. Kuwa hurinaya xasillooni darrada, carqaladaynaya is-afgaradka, ama damacooda siyaasadeed ka hormarinaya danta qaranka waa in aan loo oggolaan inay sidaas ku sii wadaan iyaga oo aan la kulmin dabagal iyo isla-xisaabtan.

Haddii la doonayo in ay Soomaaliya ka baxdo wareeggan dheer ee qalalaasaha siyaasadeed ah ee soo noqnoqday, waa in isla-xisaabtanku noqdaa qayb ka mid ah heshiiska siyaasadeed ee lagu maamulayo dalka, halkii ay noqon lahayd arrin lagu soo hambaabaro goor ay xeedho iyo fandhaal kala dhaceen.

## Waxgaradka Bulshadu Waa In aanay Gacmaha Laaban

Mas'uuliyadda ka bixidda qalalaasaha siyaasadeed ee maanta ka taagan Soomaaliya kuma koobna madaxda siyaasadda oo keliya. Heshiis siyaasadeed oo waarana laguma gaari karo siyaasiyiinta oo keliya, balse wuxuu u baahan yahay ka qaybgal firfircoon oo ay yeeshaan qaybaha bulshada ee leh kalsoonida, sumcadda iyo saameynta ay dadku aqoonsan yihiin.

Culimada, isimada dhaqanka, aqoonyahannada, ururrada xirfadlayaasha, bulshada rayidka ah iyo ganacsatada ayaa dhammaantood leh miisaan bulsho iyo sharciyad ay adag tahay in hay'adaha siyaasaddu kaligood yeeshaan. Doorkooduna ma aha mid talo bixin ku kooban; balse waa tiir muhiim u ah ilaalinta xasilloonida qaranka.

Isimada dhaqanku weli waxay ka mid yihiin hannaanada ugu jiritaanka dheer ee dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafaadka Soomaaliya. Waxay leeyihiin awood ay ku abuuraan waddooyin wadahadal marar badan ka cimri dheeraada heshiisyada iyo isbahaysiyada siyaasadeed ee ku meel gaarka ah. Sidoo kale, culimada waxay bulshada ku dhex leeyihiin sumcad iyo saameyn gaar ah, taas oo siinaysa awood ay ku dhiirrigelin karaan dhexdhexaadnimo, is-xakamayn iyo dareen masuuliyadeed oo ay muujiyaan xilliyada ay xiisaduhu kacsanyihiin.

Dhanka kale, aqoonyahannada, xirfadlayaasha iyo bulshada waxgaradka ah ee Soomaaliyeed waxay leeyihiin khibrad iyo aragti fog oo lagama maarmaan u ah hagaajinta maamul wanaagga, ballaarinta ka qaybgalka siyaasadda iyo in doodaha qaran la dhaafiyo heerkan ay joogaan ee loollanka siyaasiyiinta uun ku kooban. Ganacsataduna, iyaga ayaa laf-dhabar u ah dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee dalka, waxay dano toos ah ku qabaan xasilloonida siyaasadeed, dowladnimo isla-xisaabtan leh iyo ilaalinta kala dambaynta bulshada.

Xilli siyaasaddu ku sii siqayso tartan dhinac walba uu guushiisa ka raadinayo guuldarrada dhinaca kale, qaybahan bulshada ee aan soo tibaaxnay ayaa awood u leh inay noqdaan cod metela danta guud ee qaranka. Waxay marar badan uga dhow yihiin bulshada inteeda kale marka loo eego dhinacyada siyaasadda isku haya dalka, waxayna si ka wanaagsan ugu ololeyn karaan tanaasul, ilaalinta hay'adaha qaranka iyo in geeddi-socodka dowlad-dhisku u adeego baahiyaha shacabka, gaar ahaan haweenka, dhallinyarada iyo kooxaha aan codkoodu si ku filan uga dhex muuqan fagaareyaasha siyaasadda.

Mudnaanta ugu weyn ee maanta hortaalla Soomaaliya ma aha guul siyaasadeed oo hal dhinac gaaro, balse waa dejinta xiisadda, dib u soo celinta wadahadalka iyo in mar kale la helo is-afgarad ku saabsan xeerarka iyo hannaanada hagaya kala-guurka siyaasadeed ee dalka. Si taas loo gaaro, hoggaanka bulshadu waa in uu ka gudbaa doorka daawadennimmada ama talo soo-jeedinta guud ah una jiheystaan  kaalin intaasba ka dhow oo ah in ay foolaad u noqdaan dedaallada lagu raadinayo is-afgarad qaran.

Mid ka mid ah waddooyinka ugu macquulsan ee horay loogu socon karaa waa in la abuuro hannaan wadahadal qaran oo nidaamsan, kaas oo ay si muuqata uga qayb qaataan qaybaha bulshada ee leh sharciyadda, kalsoonida iyo saameynta bulsho, balse in badan ka maqnaa miisaska go'aan qaadashada siyaasadeed. Qaybahani waxay marar badan si ka wanaagsan dhinacyada siyaasadda u gudbin karaan dareenka, tabashooyinka iyo walaacyada shacabka, waxayna door muhiim ah ka qaadan karaan dhisidda is-afgarad, isu soo dhawaynta dhinacyada kala aragtida duwan iyo dhiirrigelinta isku-tanaasul iyo tudhaale siyaasadeed.

## Baahida Loo Qabo Hindise Heshiis Siyaasadeed Cusub

Dedaalladii ugu dambeeyay ee ay Mareykanka iyo Boqortooyada  Ingiriisku  ku doonayeen inay ku dejiyaan xiisadaha siyaasadeed isla markaana ku dhiirrigeliyaan wadahadalka ayaa muujinaya garwaaqsiga sii kordhaya ee beesha caalamku ka qabto in caqabadaha siyaasadeed ee maanta horyaalla Soomaaliya aysan ku filnayn in meel fog laga daawado, balse ay u baahan yihiin diblomaasiyad firfircoon iyo dedaallo joogto ah oo lagama maarmaan ah.

Inkasta oo dedaalladani gacan ka geysteen ilaalinta marinnada wadahadalka ee u dhexeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya, mucaaradka iyo Dowlad-goboleedyada, haddana waayo-aragnimada Soomaaliya waxay muujinaysaa in xalal waara aan laga gaari karin wada-hadallo ku kooban madaxda siyaasadda oo keliya. Qalalaasayaasha siyaasadeed ee soo noqnoqday ayaa si cad u muujiyay in daneeyayaasha siyaasadda Soomaaliyeed ay marar badan ku adkaato xallinta murannada ay iyagu abuureen, iyaga oo inta badan ka hormariya xisaabo siyaasadeed oo gaaban danta guud ee qaranka.

Sidaas darteed, waddada ugu macquulsan la iskuna halleyn karo waxtarkeeda waa waa hirgelinta hannaan wadahadal qaran oo loo dhan yahay, kaas oo isu keenaya dhinacyada siyaasadda iyo hoggaanka bulshada ee saamaynta leh. Waxaa ka mid ah culimada, isimada dhaqanka, aqoonyahannada, ururrada xirfadlayaasha, bulshada rayidka ah iyo ganacsatada. Qaybahani waxay leeyihiin sharciyad bulsho, madax-bannaani iyo xiriir dhow oo ay la leeyihiin kagana war qabaan walaacyada shacabka, taas oo u sahlaysa inay gacan ka geystaan dhisidda is-afgarad, dhiirrigelinta tanaasulka siyaasadeed iyo yaraynta kala fogaanshaha siyaasadeed.

Turkiga iyo Jabuuti waa dowlado si gaar ah ugu habboon yihiin inay door wax-ku-ool ah ka qaataan fududeynta geeddi socodkan.  Maxaa yeelay, labada dalba waxay xiriir shaqo la leeyihiin dhinacyada kala duwan ee siyaasadda Soomaaliya, waxayna ku dhex leeyihiin kalsooni door ah oo ay ka haystaan daneeyayaasha muhiimka ah. Intaa waxaa dheer, waxay muddo dheer muujiyeen sida ay uga go'an tahay taageeridda xasilloonida Soomaaliya. Iyaga oo la shaqeynaya saaxiibbada kale ee caalamiga ah. Waxayna gacan ka geysan karaan abuurista marin dheeraad ah oo lagu xoojiyo wadahadalka, lagu dejiyo xiisadaha, laguna dhiso kalsoonida gudaha xilli ay cadaadis xooggan iyo fadqalalo wajahayaan hannaanada siyaasadeed ee Soomaaliya.

Dhanka Turkiga, habkan ayaa sidoo kale ka caawin kara inuu isu-dheellitiro laba arrimood oo mararka qaar ay adagtahay in la is waafajiyo; taageeridda hay'adaha dowladda Soomaaliya iyo ka fogaanshaha aragti kasta oo dhalin karta eedeyn ku aaddan in uu dhinac gaar ah u xaglinayo oo la safanyahay. Waxaana taas sababaya xilliyada ay jiraan muranno la xiriira muddo-xileedyada, khilaafaadka doorashooyinka iyo kala qaybsanaanta siyaasadeed oo sii kordhaysa, xaaladdaas xitaa iskaashiyada caadiga ah ee dowladaha dhexmara waxa mararka qaar waxaa loo fasiran karaa taageero loo muujinayo dhinac gaar ah. Arrintaas awgeedna iskaashiyada si wanaagsan u shaqeeya xilliyada ay hay'aduhu xasilloon yihiin mar walba isla waxtarka iyo isla qaabkaas uma shaqeeyaan marka lagu jiro qalalaase siyaasadeed. Waanna arrinta lama huraanka ka dhigaysa in Turkigu uu sameeyo isku-dheellitirkaas.

Hindise wadajir ah oo ay hormuud ka yihiin Turkiga iyo Jabuuti, kuna dhisan lahaanshaha Soomaalida isla markaana ay taageerayaan saaxiibbada kale ee caalamiga ahi, wuxuu xoojin karaa dedaalladii diblomaasiyadeed ee hore u jiray. Sidoo kale, wuxuu gacan ka geysan karaa ilaalinta xasilloonida, ka hortagga kala qaybsanaan siyaasadeed oo hor leh, iyo dhawrista kalsoonida iyo sumcadda wanaagsan ee ay labada dal weli ku dhex leeyihiin bulshada Soomaaliyeed.

## Gunaanadka iyo Talo Soo Jeedinta

Soomaaliya waxay maraysaa marxalad xasaasi ah. Muran ku bilowday hannaanka doorashooyinka iyo sharciyadda muddo-xileedyada siyaasadeed ayaa maanta isu beddelay qalalaase ballaadhan oo taabanaya sharciyadda hay'adaha, kala dambaynta dastuuriga ah iyo xasilloonida dowladnimada. Isku dhacyadii 3-dii Juun waxay si cad u muujiyeen in natiijada ka dhalata siyaasadda is-biimeynta ahi aanay mar dambe ku koobnaan doonin miisaska wada-hadallada ee siyaasiyiinta, balse ay si  toos ah u saameynayso shacabka Soomaaliyeed.

Haddii aan si degdeg ah loo qaadin tallaabooyin wax ku ool ah, Soomaaliya waxay halis ugu jirtaa inay gasho wareeg kale oo kala qaybsanaan siyaasadeed ah, xilli uu dalku markiisii horeba la daalaa dhacayey amni darro, dhibaatooyin dhaqaale, cadaadisyo bini'aadantinnimo iyo loollanno juqraafi-siyaasadeed oo isa soo taraya.

Xaaladdani waa mid wax laga qaban karo, Sababtoo ah Soomaaliya weli waxay leedahay awood siyaasadeed, bulsho iyo mid diblomaasiyadeed oo lagu joojin karo in xaaladdu sii xumaato. Waxa loo baahan yahay waa in laga gudbo siyaasadda ku dhisan halka dhinac iyo iska hor imaadka loona gudbo wadahadal, tanaasul iyo in la helo mafhuum guud oo masuuliyad wadareed lagu abuuri karo.

Sidaas awgeed, talooyinka soo socda waxay mudan yihiin in si degdeg ah loo tixgeliyo:

## 1. In la bilaabo geeddi-socod Heshiis siyaasadeed oo loo dhan yahay

Dowladda Federaalka Soomaaliya, mucaaradka iyo Dowlad-goboleedyada waa inay si degdeg ah ugu heshiiyaan hannaan wadahadal oo nidaamsan kaas oo lagu xallinayo murannada la xiriira doorashooyinka, arrimaha dastuuriga ah iyo qawaaniinta hagaya kala-guurka siyaasadeed. Ujeeddadu ma aha oo keliya in la xalliyo khilaafka maanta taagan, balse waa in dib loo soo celiyo kalsoonida lagu qabo geeddi-socodka siyaasadeed ee dalka.

## 2. In haldoorka bulshada la geeyo geedka wadaxaajoodka

Culimada, isimada dhaqanka, aqoonyahanka, ganacsatada, ururrada xirfadlayaasha, haweenka iyo bulshada rayidka ah waa in si rasmi ah loogu daro dedaal kasta oo lagu raadinayo heshiis siyaasadeed. Mustaqbalka Soomaaliya laguma go'aamin karo codka siyaasiyiinta oo keliya. In qaybahaas bulshada ka midka ah ee haysta kalsoonida bulshada, saameynta iyo sumcadda ayaa muhiim inay dhiirrigeliyaan tudhaalaha iyo lexjecelada laga qabo qaranka, isku soo dhoweynta dhinacyada iyo fududeynta isu tanaasul iyo horumarinta danta qaranka.

## 3. In la abuuro hindise wadajir ah oo ay Turki iyo Jabuuti fududeeyaan

Iyadoo laga duulayo dedaallada ay hore u wadeen Mareykanka, Boqortooyada Ingiriiska iyo saaxiibbada kale ee caalamiga ahi, Turkiga iyo Jabuuti waa inay si wadajir ah u fududeeyaan wadahadal u dhexeeya daneeyayaasha siyaasadeed ee Soomaaliya. Labada dalba waxay leeyihiin kalsooni iyo xiriir shaqo oo ay la leeyihiin dhinacyada kala duwan ee siyaasadda Soomaaliya, taas oo ka dhigaysa kuwo si gaar ah ugu habboon fududeynta wadahadalkan, dejinta xiisadaha iyo dhisidda kalsoonida inay burburto qarka u saaran.

## 4. In la dhiso hannaan isla-xisaabtan oo lagaga hortegayo qaswadayaasha geeddi-socodka siyaasadeed

Hoggaanka bulshada Soomaaliyeed, iyagoo kaashanaya saaxiibbada caalamiga ah ee arrintan daneeya, waa inay abuuraan hannaan madax-bannaan oo lagu diiwaangeliyo laguna iftiimiyo falalka dhaawacaya nidaamka dastuuriga ah, hurinaya rabshadaha, carqaladaynaya wadahadalka ama wiiqaya geeddi-socodka dhismaha dowladnimada. Siyaasiyiintu waa inay fahmaan in falalka xasillooni darrada abuuraa ay leeyihiin cidhib-danbeed siyaasadeed iyo mid sumcadeed.

## 5. In dib loo xaqiijiyo ku dhaqanka dastuurka iyo dhowrista hay'adaha

Dhammaan dhinacyada siyaasaddu waa inay markale dhayda ka caddeeyaan sida ay uga go'an tahay ku dhaqanka dastuurku, ixtiraamka awoodaha iyo muddo-xileedyada hay'adaha, iyo xallnta khilaafaadka iyada oo loo marayo hannaano nabadeed. Dib-u-habaynta dastuurka ee mustaqbalkuna  waa inay xoojisaa ka waantoobidda iyo ka fogaanshaha go'aannada halka dhinac ah, murannada sharciyadda la xiriira iyo qalalaasaha doorashooyinka ee soo noqnoqda.

## 6. In xasilloonida qaranka laga hormariyo tartanka siyaasadeed

Mudnaanta ugu weyn ee maanta hortaalla Soomaaliya waa dejinta xiisadaha iyo ilaalinta xasilloonida. Ma jiro hadaf siyaasadeed oo mudan in loo huro amniga shacabka, wadajirka hay'adaha qaranka ama guulihii lagu gaaray tobannaankii sano ee dib-u-dhiska dowladnimada. Siyaasiyiintu waa inay muujiyaan is-xakamayn, isla markaana ay garwaaqsadaan in tanaasulku aanu ahayn calaamad tabar-darro, balse uu yahay shardi lagama maarmaan u ah badbaadada dowladnnimada iyo jiritaanka qaranka.

Mustaqbalka Soomaaliya laguma go'aamin doono cidda ku guulaysata loollanka siyaasadeed ee maanta taagan. Waxa uu ku xirnaan doonaa in hoggaamiyeyaasha siyaasadda iyo bulshada ay ka sarre maraan danahooda gaarka ah oo ay gaaraan is-afgarad qaran oo cusub. Soomaaliya waxay taagan tahay isgoys labo waddo leh; Mid waxay horseedaysaa kala qaybsanaan dabodheeraata, hay'ado sii daciifa iyo xasillooni darro. Midda kalena waxay horseedaysaa wadahadal, kala dambayn dastuuri ah iyo in heshiis siyaasadeed oo waari kara la gaaro.

Doorashada waddada la qaadayo waxay ku jirtaa gacanta Soomaalida Haseyeeshee waqtigu cidna ma sugayo. Arrinkuna waa:

*Nin i sugayayow heedhe, Anigoo ku sugey heedhe, Maxaad ii sugtaa heedhe?*

Sirta Nolosha, Maxamed I. Warsame Hadraawi

Juun
2026

HERITAGE
INSTITUTE